TURVAPAIKKA-,
MAAHANMUUTTO- JA
KOTOUTTAMISRAHASTO
Euroopan unionin tuella

# Waraysiga magangelyaddoonka ilmaha la codsanaya qoyskiisa ee Hoggaanka Socdaalka

Waxaa laguugu yeeray waraysiga magangelyaddoonka ee Hoggaanka Socdaalka. Hagistaan waxaa ay kuu sheegeysaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga la xiriira waraysiga lagula yeelanaayo. Adiga iyo waalidkaaga wada akhriya. Haddii wax uun ka mid ah arrinkaan aad fahmi weyso, waxaad faahfaahin dheeraad ah weydiisataa wakiilka ama shaqaalaha Hoggaanka socdaalka, bilowga hore ee waraysiga.

## Waa maxay ujeeddada waraysiga?

- Qoyskaagu waxaay Finland ka codsadeen magangelyo. Hoggaanka socdaalka waxaa uu caddaynayaa sababaha aad iyaga dartoood magangelyada uga codsatay Finland, oo sababhaas awgoodna aadan dib ugu laaban karin dalkaagii.
- Waalidkaa ayaa waraysigooda magangelyoddoonka ee lala yeelanaayo ku sheegaaya, sababta ay iyaga iyo qoyskooduba u codsanayaan magangelyada.
- Ujeeddada waraysigaan waa in adiga lagu siiyo fursadda aad ku sheegi karto arrimaha adiga muhiimka kuu ah. Waad sheegi kartaa haddii ay adiga kugu dhaceen ama ku soo mareen arrimo xun, ama ay jiraan waxyaabo aad ka baqayso. Waa muhiim in aad kulankaan ku sheegto xogta ku saabsan dhammaan waxyaabaha aad ogtahay. Si xor ah u sheeg arrimaha aad doonayso in aad ka hadasho, adigoo isticmaalaaya ereyadaada kuu gaarka ah. Haddii loo baahdo waraysi qaadaha ayaa adiga kugu caawinaya in uu su'aalo ku weydiiyo.

## Waa maxay xuquuqaha aad leedahay iyo waajibaadka adiga ku saaran ee waraysigaan dhexdiisa?

- Caadi ahaan waalidkaaga ayaa kula socda marka lagu waraysanaayo. Sidoo kale waxaa jirta wax xoogaa muddo ah oo lagu waraysan doono, iyadoo aan waalidku kula joogin.
- Waxaad xaq u leedahay waraysigaan inta uu socdo, inaad qabsato qareen kaa caawiya arrimaha sharciyada. Qareenku wuxuu wadahadalka uga qaybqaadanayaa, hadba sida aad u soo codsatid.
- Waalidkaa ayaa xil iska saaraaya haddii aad u baahato in aad hesho qareen waraysiga kula jooga. Haddii waalidkaaga uu kuu raadin waayo qareen kula jooga waraysiga, weli waan sii yeelan karnaa waraysiga xittaa iyadoo uusan qareen joogin.
- Waraysiga waxaa jooga turjubaan. Shaqada turjubaanku waa in isagoo aan cidna la jirin uu si dhexdhexaad ah u turjumaa dhammaanba wixii waraysiga dhexdiisa lagu sheego. Turjubaanku wuxuu noqon karaa mid goobta uu waraysigu ka dhacaayo jooga, ama khadka telefoonka ku turjumaaya, ama fiidiyoow ahaan u turjumaaya.
- Qofka waraysiga qaadaaya, turjubaanka, iyo qareenka waxaa saaran waajibka ah in ay sirta qariyaan, taasoo loola jeedo in aanay cid kale oo arrinkaan ka baxsan u sheegi karin wixii ay ka maqleen waraysiga dhexdiisa. Sidoo kale dukumintiyada adiga kugu saabsan waa kuwo sir ah oo la qarinaayo. Arrimaha aad ku sheegeyso waraysiga, waxaa dhici karta in ay saamayn ku yeeshaan falanqaynta codsiyada xubnaha qoyskaaga. Xaaladahaan oo kale waxaan tixgelin gaar ah siin doonnaa arrimahaas xubnaha qoyskaaga. Si kastaba waan ka qarin karnaa wixii aad sheegtay xubnaha qoyskaaga, haddii sheegista arrimahaas ay dhibaato ama halis ku keeni karaan adiga iyo ehelkaagaba. Wixii aragtidaada la xiriira ee arrimahaas ku saabsan waxaad ku sheegi kartaa waraysiga dhexdiisa.
- Runta sheeg. Haddii aadan xusuusan ama aadan garanyn, ha isku dayin in aad jawaabta adigu iska allifato ama iska hindisto, sheeg haddii aadan aqoon ama aadan xusuusan. Bixinta macluumaadka khaladka ah waxaa ay daciifinaysaa ama hoos u dhigaysaa rumaysashada la rumaysan lahaa waxa aad sheegtay.
- Marka lagu waraysanaayo waxaad sheegtaa macluumaadka aqoonsigaaga shakhsiyadeed (magaca iyo taariikhda dhalashada) ee saxda ah. Haddii aad hadhoow doonayso in aad wax ka beddesho macluumadkaaga shakhsi ahaaneed, waxaad arrinkaas awgiis u baahan tahay baasaboor ama caddaynta shakhsiyaydeed ee rasmiga ah.
- Hoggaanka Socdaalka waxaa uu macluumaadka shakhsiyadeed iyo waxyaabaha salka u ah codsigaaga ku kaydinayaa nidaamka falanqaynta xogta ee arrimaha dadka ajnabiga ah, kaasoo ah diiwaanka rasmiga ah ee dwoladda.
- In loo sheego  aqoonsi shakhsiyadeed oo khalad ah hawlwadeennada dowladda ama macluumaad aan sax ahayn oo loo gudbiyo diiwaanka dowladda, waa fal-dambiyeed ciqaab lagu mutaysanaayo. Finland gudaheeda waxaa mas'uuliyadda dambigu ay khusaysaa qofka buuxiyay da'da 15-ka sano

## Sidee ayaa waraysiga loogu soo diyaargaroobayaa?

- Waraysiga kahor isla soo akhriya adiga iyo waalidkaaga, oo u kuurgala dhammaan hagista iyo qoraallada ay ku siiyeen hawlwdeennada dowladda. Waxaa aad muhiim u ah in aad iska akhriso warbixinta ku saabsan nidaamka Dublin. Haddii aadan haysan qoraallada ku saabsan warbixintaasna, waxaad ka heli kartaa bogagga internetka ee Hoggaanka socdaalka ee cinwaankiisu yahay: migri.fi/esitteet. Warbixinnadu waxay ku hoos ku jiraan cinwaanka "Turvapaikka ja Dublin-menettely" Nidaamka Dublin iyo magangalyoddoonista.
- Haddii aad haysato sabab sax ah oo aad ku doonayso in turjubaanka ama waraysi qaadaha uu noqdo qof dumar ah ama nin, waxaad arrinkaas u sheegtaa shaqaalaha xerada qaxootiga wakhti ka horreeya xilliga waraysiga. Xerada qaxootiga ayaa codsigaaga waxay u soo gudbin doonaan Hoggaanka socdaalka (imaagareeshinka). Hoggaanka Socdaalka ayaa qiimayn ku samaynaaya, in sababtaasi ay tahay mid sax ah iyo inkale.
- Haddii xaaladdaada caafimaad ee jir ahaaneed ama nafsad ahaaneed ay tahay mid saamayn ku yeelan karta waraysiga, waxaad arrinkaas u sheegtaa shaqaalaha xerada qaxootiga. Xerada qaxootiga iyadoo haysata oggolaanshahaaga ama kan waalidkaaga, waxay arrinkaaga kala xiriirayaan Hoggaanka socdaalka, kahor inta aan waraysigu dhicin.

## Waxyaabaha lagaa doonaayo in aad samayso maalinka waraysiga Hoggaanka socdaalka

- Waraysiga dib uma dhigi kartid, wax sabab la aqbali karo la'aanteed ah. Haddii aad xanuunsato maalinka waraysiga, waa in adiga ama waalidkaa aad sida ugu dhakhsaha badan ugu soo sheegtaan xeradaada qaxootiga. Waalidkaaga ama caawiyahaaga waa inuu u soo gudbiyaa Hoggaanka socdaalka, warqadda dhakhtarka ama kalkaalisada ee ku saabsan xanuunkaaga, ugu dambayn 1 toddobaad gudihiis, laga soo bilaabo maalinkii waraysiga. Haddii aad wax sabab la aqbali karo la'aanteed ah uga joogtay waraysigii magangelyoddoonista, codsiga waxaa go'aan laga gaari karaa iyadoo aan wax waraysi ah lagaa qaadin.
- Wakhti fiican imoow goobta waraysiga, oo ha soo daahin.
- Marka aad timaaddo xarunta Hoggaanka socdaalka, waxaa lagugu samayn karaa baaritaan xagga ammaanka ah.
- Waxaad tustaa waardiyaha Hoggaanka socdaalka, kaarkaaga macmiilka ee xerada qaxootiga.
- Qolka ku sugitaanka ee Hoggaanka socdaalka waxaa imaan kara oo keliya dadka waraysiga loogu yeeray, iyo dadka kale ee hore ballanka ula lahaa Hoggaanka socdaalka.
- Haddii aad doonayso inuu ku soo raaco qof caawiye ah, waalidka ama qofka caawiyaha ah waa in ay arrinkaas qaab qoraal ah hore ugu soo weydiiyaan Hoggaanka Socdaalka. Xaaladaha kale ee arrinkaan ku saabsan qofka waraysiga

qaadaaya ayaa go'aan ka gaari kara marka waraysiga la bilaabaayo, in qofka caawiyaha ah uu ka qaybqaadan karo iyo inkale. Qofka caawiyaha ah ma ahan qareen ama looyar, kamana qayb qaadan karo caddaynta arrimaha laga hadlaayo.

- Qofka waraysiga qaadaaya waa shaqaalaha Hoggaanka socdaalka. Wuxuu waraysiga kaaga qaadaya isagoo jooga goobta waraysiga ama wuxuu waraysiga kaga soo qaybgalayaa dhanka fiidiyowga.
- Qofka waraysiga qaadaaya ayaa kaa soo kaxaynaaya qolka ku sugitaanka adiga iyo waalidkaaba.
- Waraysiga waa la duubaayaa. Waxaa intaas dheer oo qolka ku jirta kaamarad wax duubaysa.
- Waxaan markii loo baahdo qaadanaynnaa xilliyo biririf ama nasasho ah. Adiga laftigaaga markii aad u baahato waad codsan karaa biririfta ama nasashada.

## Maxaa ka dhacaaya waraysiga dhexdiisa?

- Marka ugu horraysa qofka waraysiga qaadaaya wuxuu kuu sheegayaa, waxyaabaha la samaynaayo waraysiga dhexdiisa, wuxuuna hubinayaa in aad fahamtay xuquuqdaada iyo waajibaadka lagugu leeyahay iyo inkale. Haddii aadan waxyaabaha qaarkood fahmin weydii qofka waraysiga qaadaaya. U sheeg haddii aadan fahmin hadalka turjubaanka.
- Waraysi qaadaha waxaa uu adiga ku weydiinayaa su'aalo guud, sida nolol noocee ah ayaad ku noolayd dalkaagii hooyo iyo dalkaan Finland. Wuxuu kaa codsanayaa in aad sheegto sababta aad uga soo qaxday dalkaagii hooyo, iyo sababta aadan halkaas dib ugu laaban karin. Waxaa intaas dheer wuxuu ku weydiin karaa, su'aalo uu ku caddaysanaayo wixii aad u sheegtay ee ahaa dhacdooyinka ku soo maray. Si daacadnimo leh uga jawaab. Ha allifan jawabaha. U sheeg haddii aadan xusuusan ama aadan garanayn.
- Hoggaanka Socdaalka waxaa uu waraysiga dhexdiisa kaaga dhegeysan karaa caddaymaha saamaynta ku yeelan kara go'aanka arrinkaaga. Tusaale ahaan, haddii adiga lugugu tuhunsan yahay in aad dambi ka gashay Finland ama lagugu xukumay dambi aad ka gaysatay Finland gudaheeda, waxaa arrinkaas uu saamayn ku yeelan karaa falanaqynta arrinka ee Hoggaanka Socdaalka dhexdiisa. Hoggaanka Socdaalka waxaa uu ku siinayaa haddii loo baahdo, suurtaggalnimada ah in aad waraysiga dhexdiisa ku sheegto fikirkaaga ku saabsan arrinkaas.
- Qofka waraysiga qaadaaya, kombiyuutarka ayuu ku qorayaa waxa lagu sheego waraysiga. Waxyaabahaas la qoray waxaa loo yaqaan dukumintiga qoraalka ah (pöytäkirja). Qofka waraysiga qaadaayaa ayaa adiga kula hubin doona qoraalka laga sameeyay waraysiga qayb ahaantiisa ama gabi ahaantiisa, haddii Hoggaanka socdaalka uu u arko in arrinka hubinta ah loo baahan yahay. Sheeg haddii aad qoraalka ku aragto waxyaabo khalad ah. Haddii qofka waraysiga qaadaaya uusan adiga kula hubin qoraalka laga sameeyay waraysiga gabi ahaantiisa, waxaa laguu qabanayaa wakhtiga kama dambaysta ah ee aad ku soo dirayso wixii sixitaan ama wax ku kordhin ah ee waraysiga la xiriira. Koobiga dukumintiga qoraalka ah ee waraysiga laga sameeyay waxaa la siinayaa waalidkaaga.

## Qaabkee ayuu Hoggaanka socdaalka ku gaaraa go’aanka?

- Iyadoo lagu salaynaayo codsigaaga ayaa waxaa qoyskaaga la siin karaa badbaadada caalamiga ah ama waxaa la siin karaa sharciga degganaanshaha dalka ee lagu saleeyay sababo kale.
- Hoggaanka socdaalka waxaa uu go’aan ka gaarista arrinkaaga ku salaynayaa macluumaadkii uu waalidkaaga bixiyay iyo wixii kale oo xog ah ee arrinkaan la xiriira ee la soo bandhigay. Sidoo kale wixii aad sheegtay ayaa tixgelin gaar ah la siin doonaa, marka arrinka la go’aaminaayo.
- Haddii codsigaaga la diido, qoyskiinna dib ayaa loo celin karaa waxaana la amri karaa diidmada dal soo gelista ee ku saabsan dalkaan Finland iyo wadamada uu ka dhexeeyo heshiiska Schngen.
- Haddii aad hayso waxyaabo cusub oo aasaas u ah codsiga magangelyoddoonka qaxootinnimo, kaddib marka uu go’aanka Hoggaanka socdaalka ee la xiriira codsigaaga haatan ah uu yahay mid dhaqangal ah, si dhakhso ah u samee codsi cusub. Waxaa kugu waajib ah in aad haysato wax uun sabab ah, oo sheegeysa sababta aad hore ugu sheegi weyday waxyaabaha cusub ee aad ku salaynayso codsigaaga. Sababtu waa in ay noqotaa, mid aadan adigu awoodin in aad saamayn ku yeelato. Arrinkaa kaddib waxaa Hoggaanka socdaalka uu qiimayn ku samayn doonaa in ay baaritaan ku sameeyaan codsigaaga cusub iyo inkale.